

Joojinta Aqoonsiga Allerjiga Penicillin/Amoxicillin

Waxaa feylka ilmahaaga ugu qoran in ay allarji ku keenaan penicillin ama amoxicillin. Mar la eegay su'aalo ay waalidku ka soo jawaabteen, fursadda ah in ay ilmuhu allarji dhab ah ka qaadaan penicillin/amoxicillin waa mid yar. Waxaa laga yaabaa in feylka ilmaha laga saaro allarjiga daawooyinkaas. Waxay ilmuhu ka heli karaan faa'iidooyin caafimaad oo badan.

Maxay muhiim u tahay in la ogaado haddii uusan ilmahaagu allarji ku qabin penicillin?

- Daawooyinka antibiyootiga, sida penicillin iyo amoxicillin, waxay dilaan bakteeriyo (jeermis) keena infakshan ama caabuuq marka si sax ah loo isticmaalo. Yoolka daawada antibiyootiga waa in lagu dilo oo keliya jeermiska keena caabuqa, ma aha in jirka lagu dhibaateeyo.
- Haddii ilmahaagu allarji ku yahay penicillin ama amoxicillin, looma qori karo daawooyinkaas ama dawooyin ah antibiyootig oo ay ku jirto penicillin. Waa in ay qaataan daawooyin ka duwan oo dhibaato badan u keeni kara jirka, oo dilaya jeermis jirka u fiican, oo waxtarkooda ayaa yar marka daawooyinkaas la isticmaalo.
- 9 ka mid ah 10kii ilmood ee ay feylka ugu qoran tahay allarji ah penicillin/amoxicillin allarji dhab ah kuma qabaan oo waxaa lagu soo habsaday mar labaad oo la siiyey penicillin/amoxicillin. Marka waxaa suurtoobeysa in antibiyootiga ugu fiican infakshanka mustaqbalka loo siiyo.

Waa maxay "joojintan?"

- Joojintan waa tijaabo si loo eego haddii calaamadda allarjiga ee penicillin/amoxicillin feylka ilmaha laga saari karo. Waxaa jira dhowr siyaabood oo lagu ogaan karo haddii falcelinta ilmuhu tahay allarji dhab ah:
 - Dibu-eegis lagu sameeyey taariikhdi hore ee ilmaha iyo allarjigii hore ee feylka ugu qoran waxaa la rabaa in la habsado in uusan ilmuhu daawooyinkaas ku qabin allarji dhab ah.
 - Hal mar waa in amoxicillin lagu tijaabiyo (hoos ayaa laguugu sharxay).

Waa maxay faa'iidooyinka ay leedahay in ilmaha laga baaro allarjiga penicillin/amoxicillin?

Penicillin/amoxicillin waxay leedahay faa'iidooyinka hoos ku qoran marka la barbar dhigo antibiyootiga kale ee ay isku nooca yihiin ee infakshanka loo qaato:

- Aad bay u shaqeysaa
- Waxyeelladeeda ayaa yar
- Dhibaataada ay jirka u geysaneyso ayaa yar
- Isbitaalka in la seexdo ayaa yaraanaysa
- Kharashkeeda ayaa yar

Haddii aysan ilmuhu allarji ku qabin penicillin/amoxicillin, faa'iidooyinkaas ayey heli karaan.

Maxaa dhacaya inta ilmaha la siinayo amoxicillin ah afka?

Waxaa ilmaha afka laga siin doonaa amoxicillin (daawada antibiyootig ah oo ka mid ah bahda penicillin) oo waxaa laga eegi doonaa calaamadaha falcelinta ah ee allarjiga.

- Dhakhtarka ilmaha ayaa kaaga jawaabaya su'aal kasta oo aad ka qabto dhibaataada amoxicillin nooca afka laga qaato ka hor intaan ilmaha la siin.
- Calaamadaha ilmaha laga eegayo waa, sida heerkulka, dhiigkarka, iyo garaaca wadnaha.

- Kalkaaliyaha caafimaadka ayaa ilmaha afka ka siin doona amoxicillin.
- Wakhti ah 15 daqiiqo ka dib iyo mar kale 60 daqiiqo ka dib, kalkaalisada ayaa jirka eegi doonta.
- Inta tijaabadu socoto waxaa lala socon doonaa wax kasta oo ah falcelinta allarjiga.

Maxaan anigu waalid ahaan sameynayaa inta lagu jiro tijaabinta amoxicillin nooca afka?

Kalkaalisada sheeg haddii aad ilmaha ku aragto in uu naqasku ku adkaanayo, finan, matag, ama haddii aad wax su'aalo ah ka qabto sida ilmuhu u ekaado ama habdhaqankiisu noqdo.

Waxyeellada

- Madax-xanuun
- Matag soo daaha
- Calool-xanuun
- Shuban
- Finan yaryar ama waaweyn oo soo daaha

Calaamadaha Allarjiga

- Suuxid
- Barar ah wejiga, faruuryaha ama cunaha
- Neefsashada oo ku adkaata ama hiinraagid
- Matag degdega, soo noqnoqda
- Finan yaryar ama waaweyn oo degdega

Maxaa dhacaya ka dib marka ilmaha la siiyo amoxicillin ah afka?

Haddii ilmahaagu **dhīb kala kulmo** tijaabada amoxicillin ee ah afka:

- Dhakhtarka ilmahaaga ayaa dhibkaas ka daaweyn doona
- Markaas feylka caafimaadka ee ilmahaaga LAGAMA saarayo allarjiga daawadaas
- LOOMA qori doono ilmahaaga penicillin ama amoxicillin haddii uusan u soo oggolaan dhakhtarka allarjiga.

Haddii ilmahaagu **dhīb kala kulmi waayo** tijaabada amoxicillin ee ah afka:

- Dhakhtarka ilmahaaga ayaa go'aamin doona haddii uu ilmuhu qaadan **karo** penicillin/amoxicillin marka dambe ee uu u baahdo.
- Waxaa ilmahaaga laga saari doonaa allarjiga ah penicillin/amoxicillin ee ugu qoran feylka caafimaadka ee Children's Minnesota.
- Waa in aad u sheegto goobaha caafimaadka iyo farmashiyaha allarjigii penicillin/amoxicillin ee ilmahaaga in feylka caafimaadka looga saaray iyo in lagu soo tijaabiyey amoxicillin ah afka.
- MARNA HA oran ilmahaagu allarji ayuu ku yahay penicillin/amoxicillin ilaa ay wax cusub dhacaan ka dib marka mustaqbalka mar kale loo qoro penicillin/amoxicillin.

Su'aalo?

Macluumaadkan gaar kuma aha ilmahaaga ee waa macluumaad guud ahaaneed. Haddii aad wax su'aalo ah qabto, fadlan kala hadal dhakhtarka bukaanjiifka ee ilmahaaga.